



## **War Saxaafadeed 009/2011**

### **Xukuumadda Soomaaliya oo xirtay dad lagu ee deeyay inay ka dambeeyeen weerarkii lagu qaaday Bannaanbixii Nabadda**

(Muqdisho – 16 Febraayo, 2011) Dowladda ayaa xirtay shan qof oo looga shakisan yahay inay ku lug lahaayeen weerarkii Talaadadii lagu qaaday dadweyne bannaanbax nabadeed ku sameynayay agagaarka Ex-Fiyooore ee magaalada Muqisho, weerarkaas oo ay ku geeriyoodeen illaa saddex qof oo rayid ah iyo askari ka tirsanaa dowladda.

Ra'iisul-wasaaraha, Mudane Maxamed C/laahi Maxamed, Ku-xigeenka Ra'iisul-wasaaraha, ahna Wasiirka Gaashaandhigga, Mudane C/xakiim Maxamuud, Wasiirka Arrimaha Gudaha & Amniga Qaranka, Mudane C/shakuur Sheekh Xasan iyo Wasiirka Warfaafinta, Boostaha & Isgaarsiinta, Mudane C/kariim Xasan, ayaa si wadajir ah ugu sheegay *Raadiyo Muqdisho* in ciidamada Dowladda oo kaashanaya nabad-ilaaliyeysaasha AMISOM ay xabsiga dhigeen eedeysanayaasha kala ah:

1. Maxamed Cumar Xabeb (Maxamed Dheere), Guddoomiyihii hore ee gobolka Banaadir
2. Cabdi Qeybdiid (ma aha Jen. Cabdi Xassan Cawaale Qeybdiid, Taliyihii Hore ee Ciidanka Booliska)
3. Maxamed Raage Tifow
4. Cali Nuur Maxamed
5. Nuur Cali Yalaxow

Xukuumaddu waxay xaqiijisay in eedeysanayaasha la hor keeni doono caddaaladda sida ugu dhaqsiyaha badan, iyadoo sidoo kale Xukuumaddu ay carrabka ku adkeysay in tani ay ka mid tahay tallaabooyinka ay ka qaadeyso sidii loo dhameyn lahaa dhaqanka la-xisaabtan la'aanta dadka dambiyada galay si muwaadiniintu ugu noolaadaan nabad iyo xasilloonii.